# SHAQO-BIXIYUHU IN UU ISAGU ISKA HUBIYO IN QOFKA MAGAN-GALYO CODSADAHA AHI UU XAQ U LEE YAHAY INUU SHAQAYN KARO - ADEEGII AHAA WAXAA LOO WAREEJIYEY TALEEFAN AHAAN

Xafiiska emagarayshanku mar dambe ma bixin doono caddayn qoraal ah oo sheegaysa in qof magangalyo codsade ah uu xaq u lee yahay inuu ka shaqayn karo Finland iyo in kale oo qaban karo shaqo uu wax ka qaadanayo oo mushahar ka helayo.

Sababta oo ah cadada dadka magangalyo codsadayaasha ahi sanadahan danbe waxay noqotay mid toban laabantay, saas aawadeed ayaa dalbashada caddaymaha la soo codsanayaan ay si xoog ah oo sidii hore ka badan u kordheen, codsiyadii caddaymuhuna waxay noqdeen kuwo saf galay oo isu kaaya kor fuulay. Safka waxaa ku jira boqolaal codsi ah, waxaana mudada jawaabta nala ka sugayaa noqotay dhawr bilood mid gaaraysa. Waxaan wali aqbalaynaa waraaqaha codsiyada ah ilaa 8.7.2016, waxaana caddaymaha qoraalka ah siinaynaa xiligii xagaaga ama samarkii wixii na soo gaaray oo safka ku jira.

Markii shaqo-bixiye uu doonayo inuu shaqo siiyo qof magan-galyo codsade ah oo aan sharci lahayn, talaabada ugu horaysa ee laga rabo inuu qaado waxay tahay inuu weydiiyo oo ka ogaado qofka ruuxadiisa inuu qof kani xaq u lee yahay inuu shaqayn karo iyo in kale. Xaqqa uu u lee yahay inuu shaqayn karaa waxay sida la hubo bilaabatay marka codsiga magangalyada maalinta uu dhaafay laga joogo ugu yaraan sanad barkiis, haddii aan arinta xal sharciga waafaqsan horay looga gaarin.

Dadka iyagu wakhtiga yar wadanka joogay waa in kan shaqada siinayaa uu ka hubsado xafiiska emagarayshanka ee Maahanmuuttovirasto in qofkani uu xaq u lee yahay inuu shaqayn karo. Haddaba shaqo-bixiyaha hada ka dib doonayo inuu shaqo siiyo magangalyo codsade Finland ku nool, wuxuu ku ogaanayaa taleefan ahaan, in shakhsigani xaq u lee yahay inuu shaqo mushahari ah ka shaqayn karo iyo in kale.

- Taleefan lambarku waa 0295 433 155 wuxuuna lambarkani u adeegayaa shaqo bixiyeyaasha laga bilaabo maalinta isniinta ee 11.7.2016.
- Wakhtiga loo adeegi doonaa waa isniin ilaa iyo jimce saacaddu markay tahay 9-12.
- Qofka shaqo bixiyaha ahi waa in marka uu na soo wacayo uu garanayo qofka shaqaalaha ah magaciisa iyo lambarka macmiilka ee uu ku lee yahay xafiiska emagarayshanka ee Maahanmuuttovirasto.

Lambarkan cusub wuxuu gaar u yahay oo kaliya shaqo-bixiyeyaasha. Dadka iyo magangalyo codsadayaasha ah waxaan ugu adeegaynaa sidayadii hore. Wakhtiyada aan u adeegayno iyo taleefanada lambaradooda waxaa ka helaysaa ciwaankan verkkosivuiltamme.

**Shaqada wuxuu bilaabi karaa 3 ama 6 bilood ka dib markii uu qofku wadanka soo galay ka dib**

Qofka magangalyo codsadaha ah wuxuu xaq u lee yahay inuu shaqayn karo saddex bilood ama lix bilood ka dib marka laga joogo maalintii uu is dhiibay oo qaxootinimada codsaday.

- Xuduudu waa saddex bilood, haddii magangelyo codsaduhu uu tusay ama la yimid baasaboor sax ah oo shaqaynaya ama wuxuun kale oo dokumenti ah shaqaalaha dawladda markii uu is dhiibayey oo keensanayey codsigiisa.
- Xuduudu waa lix bilood, haddii magangelyo codsaduhu uusan wadan ama keensan wax baasaboor ah.

**Xaqa uu u lee yahay inuu shaqayn karaa waa arin sharcigu qabo - mana loo baahna in gooni loo dalbado**

Qofka magagelyo codsadaha ahi inuu shaqayn karaa waa wax sharciga ku qoran. Mana u baahna in si gooni ah loo codsado. Haddii shaqada uu helay ay tahay mid soconaysa, magangelyo codsaduhu wuxuu sharciga daganaanshaha ah ku dalban karaa in lagu siiyo shaqadaas.

Shaqo bixiyaha waxaa waajib ka saaran yahay inuu hubiyo in qofka ajnabiga ah ee uu shaqada siinayaa xaq u lee yahay inuu shaqayn karo iyo in kale. Shaqo bixiyaha waxaa sidoo kale khasab ku ah in uu hadba mar iska hubiyo in magangelyo codsadaha xaqnimadii uu u lahaa inuu dalkan ka shaqeeyo ay dhamaatay oo wax iska badaleen. Sidoo kalana magangelyo codsadaha waxaa waajib ku ah inuu ka taxadiro inuusan shaqayn isaga oo aan xaq taas u lahayn - waana in uu u sheego shaqo bixiyaha haddii xaqnimadii uu in uu dalkan ka shaqeeyo ahayd ka dhamaatay. Kan shaqaalaha ah iyo kan shaqo bixiyaha ah labadaba waa lagu ciqaabi karaa haddii ay galaan shaqo aysan xaq u lahayn.

Xaqnimada uu u lee yahay inuu shaqayn karaa waxay soconaysaa ilaa iyo inta codsigiisi magangelyada laga gaarayo go'aan sharciyeeysan. Go'aan sharciyeeysan waxaa loola jeedaa in maxkamadda-maamulka ama maxkamadda sare ee maamulku ay kiiskiisa ka bixisay go'aan ama in maxkamadda sare ee maamulku ay u diiday inuu qaato rafcaan. Tusaale ahaan:

- Haddii xafiiska emagarayshanku uu ku siiyo go'aan negatiif ah oo codsigaagi magangalyada soo diido, waxaa markaas adiga codsade ahaan aad xaq u lee dahay inaad dalka ka shaqayn karto mudada rafcaanku kuu maqan yahay oo aad jawaabta sugayso.
- Haddii xafiiska emagarayshanku uu ku siiyo go'aan boosatiif ah oo aqbalo codsigaagi magangalyada, waxaa markaas adigu codsade ahaan helaysaa sharci daganaansho ah, kaas oo inta badan ay ku hoos jirto inaad xaq u lee dahay inaad dalkan ka shaqayn karto.

**Ku adeegga taleefanka ayaa ah mid xoog badan oo aad u dhakhso badan**

Waa iska dhaafnay warqaddii qoraalka ahayd ee aan qori jirnay oo ku saabsanayd in la soo cadeeyo in magangelyo codsaduhu hayso ogolaansho shaqo, sababta oo ah wakhtiga aan u istcimaalayno warqadda qoristeedu waa mid ka go'an xalinta codsiyada magangalyada ee dadka qaxootiga ah. Sharcigu kama dhigayo shardi in caddayn gaar ah la qoro, ee xaqqa qofka magangelyo codsadaha ahi u lee yahay inuu shaqayn karo waa mid jira xataa caddayn la'aan jira oo shaqayn kara.

Markii tirada dadka magangelyo codsadayaasha ahi ay inta ka yarayd, waxaan u arkaynay, in caddayn qoraal ah in la bixiyaa ay tahay sida ugu wanaagsan ee aan shaqo bixiyayaasha ugu adeegi karno. Sababtuna waxay tahay adeegan su'aashiisa iyo waraaqihiisu si aad ah ayeey noogu bateen, waxaana wanaagsan oo dhakhso badan marka la eego dhinaca inay magangelyo codsadayaashu shaqo helaan ah in aan arintaan si dhakhso ah taleefanka ugu xalino.

Waxaan rajaynaynaa in qaabkan aan qaadanay ay dadka magagelyo codsadayaasha ahi si lug gooya ah isaga sugin inay shaqo bilaabaan oo iska xayirnaan.